Waxa ugu horeeya ee dadka loo kala xukumaayo Maalinta Qiyaamaha waa Dhiiga

Cabdullaahi Binu Mascuud- Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Waxa ugu horeeya ee dadka loo kala xukumaayo Maalinta Qiyaamaha waa Dhiiga".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-wuxuu sheegay waxa ugu horeeya ee loo kala xukumayo dadka is dulmayey Maalinta Qiyaamaha waa: Dhiiga, sida dilka iyo dhaawacyada.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/2962